Dhammaadka Daryeelka Nolosha – Hagitaanka taageeridda qaba naafonimada garasho iyo koboceed

Macluumaadka Asaasiga ah

U oggolaanshaha dadka in doorashooyinka horeba loo sii ogaado waxay caawisaa xogogaalnimada dadka iyaga daryeelaya ee rabitaankooda waxayna caawisaa yaraynta warwarka iyo walaaca ku aaddan daryeelka. Macluumaadka ku qoran dokumentigan oo ka socda Xafiiska Adeegyada Naafonimada Koboceed (ODDS) waxa loogu talogalay inuu ka taageero maareeyayaasha kiiska inay ka caawiyaan hagista qoysaska iyo daryeelayaasha maaraynta wada sheekaysiyada adag ee kusaabsan doorashooyinka daryeelka caafimaad iyo dhammaadka nolosha.

Ogaanshaha Xuquuqda Qofka

Dadka looguma diidi karo daawaynta ama daryeelka inay yihiin qaar garasho ama koboc ahaan naafo (I/DD). Dhammaan dadka muddakarka ah sidoo kale waxay leeyihiin xuquuq sharci ah inay qaataan go'aanada caafimaadkooda ilaa qof kale loo igmaday inay go'aanadan qaataan, oo uu u igmaday qofka laftiisu, ama cid kale oo awood sharci u leh. Haddaba, qofka la igmaday waa inuu sii wado inuu ku xisaabtamo doorbidyada iyo rabitaanada qofka ee kusaabsan daryeelka iyo daawaynta caafimaad. Marka qofku ku sugan yahay xarun caafimaad ama la hadlayo xirfadlayaal caafimaad, wuxuu xaq u leeyahay in macluumaadka lagu fahamsiiyo qaabka uu fahmayo. Haddii ay ku adag tahay fahmidda waxa xirfadlaha caafimaad dhahayo, qofku wuxuu codsan karaa inuu si kale u dhigo, aayar hadlo, ama waydiisan karaa haddii uu soo kaxaysan karo daryeele, u-doode ama xubin qoyska ah si ay u caawiso. Marka ay tagaan xafiiska dhakhtarka, cusbitaal ama fuushan yihiin ambalaas, waxa jira qalab diyaar ah oo caawinaya xiriirka, oo ay kujiraan sabuuradaha xiriirka daryeelka caafimaaadka. Wuxuu ka soo horjeedaa sharciga in xirfadlayaasha caafimaadku ay daawayn waayaan qofka marka qofku dhaawacmo ama bukoodo, gaar ahaan iyagoo eegaya qoomiyadda, jinsiga, naafonimada ama awoodda dhaqaale ee qofka. Haddii qofku sheego inuu la kulmay takoor, ha la tashado koox u-doodista

qaabilsan. Maamulka Caafimaadka Oregon sidoo kale wuxuu soosaaray hagitaanka takoor la'aanta.

Goorma ayaan kala hadli karaa qof go'aano caafimaad iyo doorbidyada daryeelka quusta nolosha?

Wakhti kasta waa mid ku habboon inaad kala hadasho qofka rabitaanadiisa daawaynta iyo dayreelka caafimaadka. Wakhtiyada kale ee ay tahay inaad kala hadasho qofka arrimahan waxay noqon karaan kadib markii la ogaado caafimaad ahaan inuu halis kujiro qofku, ama marka uu gaboobay ee caafimaadkiisa guud uu bilaabay inuu sii xumaado. Maareeyayaasha kiisasku waa inay isku dayaan inay dib ugu laabtaan soo hadal-qaadista arrintan sanadkii ama labadii sanaba mar, gaar ahaan marka qofku sii duqoobayo ama baahiyihiisa daryeelka caafimaadku isbaddalaan.

Hubi markii aad qof kala hadlayso rabitaankiisa inuu kujiro bii'ad uu deggan yahay iyo inuu darmeemo xoogaa asturnaan ah, markii ay suurtogal tahay. Kula hadlidda dadka kale agtooda, gaar ahaan haddii rabitaanadooda ama waxyaalaha ay aaminsan yihiin kala duwan yihiin waxay noqon kartaa wax qofka ku dhib ah mana noqonayo qofku mid daacad kuugu warrama. Mararka qaar ma aha wakhtigii saxda ahaa ee laga hadli lahaa, sidaa darteed haddii qofku aanu jawaabayn, wakhti kale isku day mar labaad. Waxa dadku aaminsan yihiin way kala duwan yihiin, markaa tiisa hayste ha noqon ama ha isku dayin inaad qofka maskaxdiisa baddasho haddii aydaan isku wax rumaysnayn ama aad ku kala duwan tihiin doorashooyinka.

Waa maxay ikthiyaarada diiwaangalinta go'aamada caafimaad?

Waxa jira laba farsamo oo muhiim ah oo qofka ka caawiya inuu ugu gudbiyo doorbidyadiisa daawaynta xirfadlayaasha caafimaadka ee daryeelaya. Waxay yihiin dardaaranka hore iyo POLST.

Dardaaranka Hore

Dardaaranku wuxuu u oggolaadaa qofka inuu diiwaangaliyo doorbidyadiisa daawaynta ee daryeelka caafimaadka iyo taageeridda nolosha si dhakhaatiirtu u ogaadaan waxa qofku doonayo xiitaa haddii qofku aanu hadli karin jirro ama dhaawac dartii. Sidoo kale waxa lagu xusaa qof uu qofkani (dhibaataysan)

doortay oo go'aanada qaata isagoo isaga matalaya haddii uu qofku aanu isagu hadli karin. Qofkan waxa loo yaqaan Wakiilka Daryeelka Caafmaadka (HCR). HCR wuxuu leeyahay waajib sharci oo uu ugu qaato go'aanada caafimaad qofka uu matalayo isagoo ka duulaya doorbidyada daawaynta ee qofku uu isaga la wadaagay iyadoo ku salaysan waxa HCR rumaysan yahay inuu qofka bukaa rabay. Haddii HCR-ku aanu garanayn waxa qofku dooni lahaa, markaa waa in go'aanka lagu saleeyaa danaha ugu fiican ee qofka.

Haddii qofka aan loo xilsaarin HCR, markaa nidaamka qoyska iyo saaxiibada ee looga fadhiyo inay go'aanka u qaataan waa ka hoos lagu taxay Sharciga Oregon ee Dib loo Eegay (ORS) 127.635(2). Haddii HCR aan wali la aqoonsan karin, markaa habraacyada naf-ku-haynta ayaa la sii wadi karaa ama la iska dayn doonaa iyadoo la raacayo tilmaanta iyo amarka dhakhtarka.

Habraacyada naf-ku-haynta waxa kaliya faraha laga qaadi karaa markii lala tashado qoyska iyo saaxiibada dhaw iyo, haddii ay khusayso, maareeyaha kiiska ee qofka. Maareeyaha kiiska ee hela ogaysiis kusaabsan ku talo jirista sii wadista daawaynta naf-ku-haynta ayaa looga baahan yahay inuu bixiyo wixii macluumaad ah ee maareeyaha kiisku hayo ee la xiriira qiyamka qofka, waxa qofku aaminsan yahay iyo doorbidyadiisa ee la xiriira habraacyada naf-ku-haynta.

Oregon POLST™

POLST waxay u taagan tahay Portable (ama Physician) Orders for Life-Sustaining Treatment. Waa foom u baddalaya doorbidyada daawaynta caafimaad ee qofka amar caafimaad. Buuxinta POLST had iyo jeer waa iskaa waxaana dhici karta in dhakhtar uu keeno POLST haddii qof uu si daran u buko uuna u dhaw yahay inuu geeriyoodo. Waxa ku diiwaangashan noocyada daawaynta caafimaad iyo taageerada nolosha ee qofku rabo in lagu daaweeyo xanuunka daran ee haya waxa kale oo ku qoran doorbidyadiisa ku aadan helitaanka CPR (cardiopulmonary resuscitation) haddii neefsiga uu joojiyo. POLST **kuma** habbon qofka qaba naafonimo sababtuna waa inuu naafo yahay oo kaliya. Waxa kaliya loogu talogalay dadka qaba xaalado halis ah sida kansar ama xanuun wadnaha ah oo fogaaday, kuwaasi oo raba inay hubiyaan in doorbidyadooda daawaynta lagu dhaqmay markii ay sii dhimanayeen.

Oraah kale oo caan ah waa DNR- Do Not Resuscitate (Dib Ha U Maaxin). Kani waa go'aan shakhsi ah oo qofi qaato si xirfadlayaasha caafimaad ay u ogaadaan waxa la yeelayo xaaladda degdegga ah. Ahaanshaha "DNR" waxay ka dhigan tahay haddii qofku qabo dhaawac ama jirro noloshiisa goyn kara, shaqaalaha caafimaad ayna samayn doonin CPR ama habraacyada kale si uu u sii noolaado. Qofku wuxuu yeelan karaa DNR iyo POLST, maadaama oo aanay waxba iskaga xirnayn.

Dardaaranka hore iyo POLST waa isku mid, laakiin waxa jira kala duwanaansho muhiim ah:

Dardaaranka Hore	**POLST**
Iskaa - shardi ma noqon karo.	Iskaa - shardi ma noqon karo.
Ma aha amar caafimaad mana raaci karaan farsamo-yaqaanada caafimaadka ee xaaladda degdegga ah. Dardaaran hore waa dokumenti sharci ah.	Amar caafimaad oo uu saxeexay xirfadle caafimaad; waxa la raaci xaaladda degdegga ah.
La dhammaystiro markasta, iyadoon la eegin caafimaadka. Muddakarka kaliya.	La dhammaystiro marka dhammaadka noloshu soo dhawaato.
La baddali karo ama laga laaban karo markasta.	La baddali karo ama laga laaban karo markasta, iyadoo la kaashanayo xirfadle caafimaad.
Ka dhigta go'aanada dhammaadka nolosha qaar la ogyahay	Ka dhigta go'aanada dhammaadka nolosha qaar la ogyahay
Waxa buuxiya qofka	Waxa buuxiya xirfadle caafimaad (oo haysta oggolaanshaha qofka)
Saxeexa qofka, maragyo iyo wakiilka daryeelka caafimaadka	Saxeexa xirfadle caafimaad

U xilsaara wakiil daryeel caafimaad	U xilsaarin wakiil daryeel caafimaad
Nuqullo ayey tahay in la siiyo dhakhtarka iyo HCR	POLST waxa lagu dari karaa diiwaanka POLST si dhakhtarka cusbitaal kasta oo Oregon ku yaalaa uu u ogaado rabitaanada daawaynta ee qofka.

Macluumaadka U-doodaha Daryeelka Caafimaadka (HCA) ee maareeyayaasha kiisaska: Haddii aad taageerto qof aan awoodin inuu qaato go'aano caafimaad ama aad isku xilqaanto noqoshada wakiilkiisa daryeelka caafimaad, qofku waxa dhici karta inuu ka faa'ido taageerada kooxda Qorshaha Taageerada Qofka (ISP) ee uu magacaabo U-doodaha Daryeelka Caafimaadka (HCA) sida uu dhigayo Xeerka Maamul ee Oregon 411-390.

HCA-ga waxa la magacaabi karaa marka shuruudaha qaar la buuxiyo, sida:

- Dhakhtar ama maxkamad ay go'aamisay in qofku aanu awoodin inuu bixiyo oggolaansho xogogaal ah.
- Qofku aanu diidin oo aanu lahayn wakiil daryeelka caafimaadka ah ama masuul sharci ah oo leh awood go'aan-qaadasho oo caafimaad iyo kooxdu isku raaceen in taageerada HCA loo baahan yahay.

HCA wuxuu qaadan karaa qaar kamid ah go'aanada caafimaad isagoo u taagan qofka uu matalayo. HCA looma oggola inuu qaato go'aano kusaabsan joojinta ama sii wadidda daawaynta naf-ku-haynta, laakiin waxa shaqadiisa ah inuu ku wargeliyo kooxda caafimaad wixii kusaabsan qiyamka, doorbidyada iyo waxyaalaha uu qofku aaminsan yahay. ODDS waxay bixisaa tabobarro onlayn ah oo loogu talogalay maareeyayaasha kiisaska iyo kooxda ISP oo kusaabsan HCA, dardaaranka hore iyo POLST.

Marka go'aaminta waxyaalaha la dooranayo, kuwani waa qaar kamida su'aalo muhiim ah oo ay tahay in maanka lagu hayo:

Qofku miyuu doonayaa in tuumbo la galiyo?

Tuumbo-galintu waa marka tuumbo la galiyo qofka afkiisa oo lagu dhaadhiciyo cunaha si sambabada hawo loo gaarsiiyo si qofku u neefsan karo. Tani sida badan waa kumeel gaar ilaa jirka qofku uu weli ku filan yahay inuu qofku iskii ugu neefsado mar labaad.

Qofku ma doonayaa in lagu xiro mishiinka neefsiga haddii aanu isagu iskii u neefsan karayn?

Fentileetar waa mishiin loo isticmaalo in qofka laga caawiyo inuu neefsado markii aanu isagu iskii u neefsan karin. Tani sida badan waa kumeel gaar ilaa jirka qofku uu weli ku filan yahay inuu qofku iskii ugu neefsado mar labaad.

Qofku miyuu doonayaa in lagu sameeyo CPR?

CPR- Cardiopulmonary Resuscitation (Soo Maaxinta Wadnaha) waa habraac naf-badbaadin oo gurmad ah oo la sameeyo marka wadnaha qofku joojiyo garaaca. CPR wuxuu caawiyaa in dhiiggu dib ugu qulqulo xubnaha qofka si uu uga caawiyo inay sii noolaadaan marka uu qofku aanu dhaqdhaqaaqayn oo aanu neefsanayn.

Miyuu qofku doonayaa in caloosha tuumbo laga galiyo si loo quudiyo haddii aanu waxba cuni karin?

Waa maxay tuumada quudintu? Waxa jira dhawr nooc oo tuumbooyin ah oo loo galin karo si kumeel gaar ah ama joogto jirka qofka si cunto loogu siiyo.

Haddii maskaxda qofku ay dhaawac qabto oo ayna taageero u fidin karin xubihiisa, ma rabaa qofku inuu kujiro xaalad nolol taageerid? Waa maxay taageerada noloshadu?

Taageerada nolosha waxa loo isticmaalaa in lagu sharaxo marka qof u baahan karo inuu qaato isku darka mishiino iyo daawo si looga caawiyo inuu sii noolaado marka dhaawac ama jirro halis ah uu qabo.

Haddii qofka noloshiisu quus kujirto, halkee ayuu rabaa in lagu taageero - guriga mise xarun?

Dadku waxay dooran karaan halka ay rabaan inay ku qaataan maalmaha ugu dambeeya ee noloshooda. Go'aaminta haddii qof rabo in guriga taageerada lagu siiyo ama xarunta waa mawduuc muhiim ah oo ay tahay in laga hadlo.

Khayraadka

Dardaaranka Hore: Waxaad ka heli kartaa dardaaranka hore onlayn isagoo Ingiriisi ah iyo isagoo Isbaanish ah halkan: https://www.oregon.gov/oha/PH/ABOUT/Pages/AdvanceDirectiveAdoptionCommittee.aspx

Sidoo kale waxa laga soo iibsan karaa Go'aamada Caafimaadka Oregon oo Ingiriisi ama Isbaanish ah. Qaybtan waxa kujira hage wada-sheekaysi caawimo leh iyo su'aalaha laga wada hadlayo oo loogu talogalay in qofka iyo HCR-ka isla eegaan si HCR-ku xog buuxda uga hayo doorbidyada iyo qiyamka daryeelka qofka: https://www.oregonhealthdecisions.org/#

Oregon POLST™: https://oregonpolst.org/. Websaytkan waxaad ka heli doontaa khayraad tiro badan oo uu kujiro nuqul ah foomka POLST iyo buug hage ah oo loogu talogalay isticmaalka POLST ee dadka qaba naafooyin koboceed kuwaasi oo nolosha quus kaga jira: https://static1.squarespace.com/static/52dc687be4b032209172e33e/t/5dd46c490739db187dd5d056/1574202443929/POLST+for+DD+2019.11.18+final.pdf. POLST sidoo kale waxay leedahay janal YouTube ah, https://www.youtube.com/user/ORPOLST halkaasi oo ay kujiraan fiidyawyo loogu talogalay bixiyayaasha daryeelka caafimaadka, bukaanada iyo qoysaska iyo fiidyaw cusub oo kusaabsan POLST iyo Coronavirus.

Xuquuqda Naafada Oregon, hage kusaabsan ogaanshaha xuquuqdaada daawaynta caafimaad: https://droregon.org/wp-content/uploads/DRO-KYR-COVID-19-and-Your-Right-to-Medical-Treatment-Final-1.pdf

Hagaha Bilaa Takoorka Maamulka Caafimaadka Oregon: https://sharedsystems.dhsoha.state.or.us/DHSForms/Served/le2288R.pdf

Oregon Self-Advocacy Coalition iyo **OHSU's Center of Excellence in Developmental Disabilities** oo abuureen khayraad onlayn ah oo loo yaqaan Qaadista Masuuliyadda Agabkayga Daryeelka Caafimaadka. Kani waa agab sheegaya naftaa-u-doodayaal daboolaya mawduucyada sida naftaa-u-doodis daryeelka caafimaadka, calaamadaha jirrada, raadinta dhakhtar iyo joogista guriga. https://www.ohsu.edu/oregon-office-on-disability-and-health/taking-charge-my-health-care

Khayraadka Coalition for Compassionate Care of California, waxa kamid ah hage Taageeridda iyo Hagaajinta Go'aan-Qaadashada Daryeelka Caafimaad iyo Qorshaynta Nolol-Ka-Quusashada Dadka qaba Naafooyinka Garasho iyo Koboceed: https://coalitionccc.org/tools-resources/people-with-developmental-disabilities/

Your Right to Direct Your Health Care Needs oo ka socda Waaxda Adeegyada Aadanaha Wisconsin: https://www.dhs.wisconsin.gov/publications/p6/p62025.pdf

Hagista Stony Brook University kusaabsan ugu Diyaarinta Dadka qaba Naafooyinka Garasho/Koboceed Daawayn Caafimaad Cusbitaalada: https://you.stonybrook.edu/disabilitycovid19forms/2020/04/08/preparing-individuals-with-intellectual-developmental-disabilities-for-medical-treatment-at-hospitals/

Agabka Xuquuqda **Communication First**: https://communicationfirst.org/covid-19/

Patient-Provider Communication Forum, oo haysta taageerada United States Society of Augmentative and Alternative Communication (USSAAC), agabka xiriirka bukaanka: https://www.patientprovidercommunication.org/supporting-communication-covid-19.htm